

# COVID-19: WEHELKA SAXAFIYIINTA

**Hagaha Badqabka iyo Xirfada Saxafiyyiinta  
ka Warbixinaya Cudurka COVID-19**



**BOOK-YARE LOOGU TALAGALAY SAXAFIYIINTA SOOMAALIYEED**



**EU-IOM**  
Joint Initiative for  
Migrant Protection  
and Reintegration

Daabacaaddan waxaa lagu soo saaray taageerada dhaqaale ee Midowga Yurub. Waxyabaha ay ka kooban tahay waxay mas'uuliyadooda tahay NUSOJ iyo IOM oo kama tarjumeysyo aragtida Midowga Yurub. Xuquuqda daabacaadu way xifdisan. Ruqsad shuruud leh waxaa u siiyay Midowga Yurub.

**Ururka Qaranka Suxufiyiinta Soomaaliyeed (NUSOJ)**  
© NUSOJ 2021

**Buuggan yar waxaa la sameeyey iyada oo lala kaashanayo  
EU-IOM Joint Initiative for Migrant Protection and  
Reintegration**



**EU-IOM**  
Joint Initiative for  
Migrant Protection  
and Reintegration



**Mashruucan waxaa maal galiiyay Midowga Yurub  
Mashruucan waxaa fulinayso IOM**

Suxafiyiinta Soomaaliyeed kuma cusba inay ku shaqeeyaan xaaladaha adag. Soddonki sano ee lasoo dhaafay, waxaynu ka shaqeeneynay mid kamid ah bii'ooyinka ugu khatarta badan dunida ee uu wariye ka shaqeeyo.

Laakinse intii la tabinayey arrimaha la xiriira argagixisada, xagjirnimada iyo takoorka diimeed, waxaynu wajahnay cadaw muuqda kaasoo ay jireen siyaabo kala duwan oo looga badbaadi karay; Xilligan uu COVID-19 jiro waxaan wajahaynaa cadaw cusub kaasoo soo muuqda oo kaliya inta badan xilli dambe oo qofka dhibbanaha ah uusan waxba ka gaari karin.

Tebinta xaaladaha degdegga ah waxay saxafiga u keentaa laba caqabood oo degdeg ah. Marka hore, waa inuu ka fakaraa badqabkiisa oo ah inuu nafsaddiisa badbaadiyo. Marka xigtana, waa inuu si xirfad leh u gutaa shaqadiisa.

Labada caqaboodba waa kuwo taagan marka aan tabinayno iyo marka aan bulshada ka wacyi galinayno khataraha iyo baahidda cudurka, dagaalka lagula jiro COVID 19. Meelaha ay tas-hiilaadku ku yar yihiienna, suxufiyiintu iyaga ayaa isku tashta.

Buug yarahan ku saabsan ‘COVID-19’ waxaa loogu talagalay inuu noqdo hage fudud ee tixraaceed oo ka caawiya suxufiyiinta inay u shaqeeyaan si xirfad leh iyagoo ilaalinaya badqabkooda marka ay gudanayaan waajibaadka tabinta COVID-19.

Buuggan waxaa loo qaabeeyay saddex qeeybood oo fudud. Qaybta koobaad waxay diiradda saareysaa warbixinta aan ubaahannahay inaan si xirfadnimo leh uga soo gudbinno cudurka safmarka ah ee COVID-19. Qeeybta labaad waxay ka hadlaysaa talooyinka badqabka, halka qeeybta saddexaad ay soo koobeyso mawduuc xasaasi ah oo la xiriira ka soo warbixinta dadka muhaajiriinta ah, kuwa dalka dib ugu soo laabanaya, iyo sidoo kale xadgudubyada ku salaysan Galmada iyo kuwa Jinsiga (SGBV) xiligaan lagu guda jiro ‘COVID-19’.

Waxaan rajeyneynaa inaad ka heli doontid buuggan hagaha ah, islamarkaana uu wax badan oo waxtar leh kugu soo kordhin doono. Waxaa sidoo kale rajeyneynaa inaad noo soo gudbisaan jawaab-celintiinna si ay nooga caawiso inaan hormarino Hagahan.

Ugu danbeeeyntii, aniga oo ku hadlaya magaca Ururka Qaranka Suxufiyiinta Soomaaliyeed (NUSOJ), iyo guud ahaan bahda saxaafadda Soomaaliyeed inaan u mahadceliyo Hay'adda Caalamiga ah ee Socdaalka (IOM) ee Soomaaliya oo taabbagliiyay hawshan aadka uqiimaha badan ayadoo uu maal geliyay Midowga Yurub. Waxaan sidoo kale umahadcelinnayaan saaxibbadeena si hagar la'aanta ah noo caawiyay oo uu kamid yahay Ururka Suxufiyiinta Adduunka (IFJ) oo suurra galiyay inaan soo saarno buug yarahan.

**Cumar Faaruuq Cismaan  
XOGHAYAHA GUUD**

# TABLE OF CONTENTS

<b>GOGOLDHIG</b>	-----	<b>2</b>
<b>HORDHAC</b>	-----	<b>4</b>
<b>KASOO WARAMIDDA COVID-19</b>	-----	<b>5</b>
Mudnaanta Kowaad Sii Mabaadii'da Saxaafadda	-----	5
FAHMIDDA COVID-19	-----	7
Astaamaha	-----	7
U nuglaanta Cudurka	-----	7
Gudbinta Cudurka	-----	8
Habka warbixinta hoos-ilaa-kor (Bottom-up)	-----	8
Raadinta Ilo-wareedyo	-----	9
Helidda Ilo-wareedyo Lagu Kalsoonaan karo	-----	9
<b>MACLUUMAAD INTERNETKA LAGA HELO</b>	-----	<b>10</b>
Burinta Khuraafaadka	-----	10
Doorka Kor-joogteynta	-----	12
Cuqdad	-----	12
<b>BADQABKA</b>	-----	<b>13</b>
Ka fogow COVID-19 adiga oo raacaya tilmaamaha soo socda:	-----	13
Xarumaha Warbaahinta:	-----	14
Isticmaalka Internetka	-----	15
<b>KA SOO WARBIXINTA ARRIMAHAA JINSIGA, SOO GALOOTIGA IYO DADKA DIB UGU SOO NOQDAY DALKA</b>	-----	<b>16</b>
Ajnabi nacaybka, COVID-19, Muhaajiriinta iyo Qaxootiga Soo Laabtay	-----	16
Maxaa laga taxadaraya?	-----	17
<b>WARBAAHIN UJEEDDO LEH</b>	-----	<b>20</b>

# HORDHAC

Safmarka Cudurka COVID-19 waa caqabadda caafimaad ee ugu weyn adduunka oo idil. Heer xirfadeed iyo heer shakhsiyeed labadaba, qofka suxufiga ah waxa ay usaameeyda xaaladaan si qaas ah. Maadaama uu yahay Gudbiyaha Macluumaadka, wariyaha waa buundada udhaxeysa dadweynaha iyo xeel-dheerayaasha caafimaadka, seynisyahannada iyo guud ahaan shaqaalaha caafimaadka.

Inta lagu gudajiro raadinta macluumaadka, weriyaha waa shaqaalaha safka hore ka jooga furinta cudurka, waxa uuna si toos ah ugu nugul yahay halista Cudurka. Saxafiyiintu, inta ay soo tabinayaan wararka la xiriira cudurka, waxay la kulmaan dad badan oo kamid ah kuwa unugul cudurka. Sidaas darteed, haddii aysan raacin Habraacyada Caadiga ah ee loogu talagalay in lagu ilaaliyo naftooda iyo tan dadka kale ee ku xeeran, wariyayaashu waxay iyagoo aan ogeyn faafin karaan cudurka Covid-19, taas oo khatar galineysa nolosha dad badan oo bulshada kamid ah. Sababtaan awgeed, waxaa wanaagsan inay wariyayaashu ogaadaan xaaladdooda COVID-19 kahor inta aysan ubixin tabinta iyo kasoo warramidda cudurka, sidoo kale inay ka warqabaan calaamadaha cudurka safmarka ah ee COVID-19. Markii aysan jirin aqoonta noocaan oo kale ah, waxaa muhiim ah in la qaado tallaabooyin taxadarid ah, si looga fogaado faafitaanka iyo baahitaanka cudurka, islamarkaana in la raaco tallaabooyinka badbaadada iyo Habraacyada caadiga ah ee loogu talagalay la-falgalka cudurka kuwaas oo ay ku talinayaan hey'adaha caafimaadka.

Casrigaan oo ay jiraan baraha bulshada iyo warbaahinta shakhsiga ah, dadweynaha waxaa loo gudbiyaa warar been abuur ah iyo dacaayado aan xaqiqi ku saleysney, kuwaas oo laga yaabo inay dadka qoraa ay run u ekeysiiyaan. Waxa ka soocaya suxufiga xirfadlaha ah ilahaas waa inuu isaga/iyada tahay mid si lagu kalsoonyahay ku beenin kara wararkas marin-habaabinta ah, walibana soo gudbin kara xaqiqida saxda ah ee jirta, isagoo soo tabinaya xog la isku halleyn karo oo ku saabsan cudurka, kuna soo gudbinaya waqtiga ku habboon.

Saynisyahanadu waxay ka filayaan saxafiyiinta inay soo gudbiyaan macluumaad sugar oo ku saabsan aafada cudurka dilaaga ah ee COVID-19, taas oo lagu badbaadin karo nolosha dadka, islamarkaana hoos loogu dhigi karo faafitaankiisa, iyagoo markaa kusoo warinaya luqad fudud oo ay fahmi karaan dadka iyadoo aan runta laga weecan. Sidoo kale bulshada guud ahaanteed waxay ka filayaan saxafiyiinta inay soo tabiyaan warbixinno waxtar leh iyo xog lagu kalsoonaan karo oo la hubiyay, oo walibana soo bandhigaan runta qarsoon ee ku gadaaman cudurka, ayagoo islamarkaana la xisaabtamaaya hey'adaha shaqada ku leh waxkaqabashada Cudurka.

# KASOO WARAMIDDA COVID-19

## Mudnaanta Kowaad Sii Mabaadii'da Saxaafadda

Waxey doontaba haku saabsanaato sheekada'e, aas-aas ahaan, ma jiro wax u dhigma wariyanamada wanaagsan. Saxaafadda wanaagsani waxaa had iyo jeer haga mabaadi'da Saksanaanta xogta, Dhex-dhexaadnimada, Madaxbannaanida, iyo Isu-dheelitirnaanta. Mar kasta oo ay dillaacaan cudurrada safmarenka ah ee dhaqsaha u faafa, waxaa abuurma jahwareer iyo walaac. Dadku waxa ay galaan xaalad walwal leh iyagoo raadinaya jiho iyo tilmaamo, iyada oo ay jiraan macluumaad fara badan oo aan had iyo jeer sax ahayn.

Si kastaba xaaladdu ha u adkaatee, COVID-19 waxa uu fursad u yahay saxafiyiinta xirfadlaasha ah si ay isku caddeeyaan inay yihiin isha la isku halleyn karo ee laga helo macluumaadka saxda ah, taas oo ka caawin karta dadka inay gaaraan go'aanno xog ogaal ah oo nafta lagu badbaadin karo.

Si taa loo gaaro, saxafiyiinta waa inay u hogaaansamaan mabaadi'da aasaasiga ah ee saksanaanta xogta, dhedhexaanimada, madaxbannaanida, iyo isu dheelitirnaanta.

Isu dheelitirnaantu waa muhiim maxaa yeelay wakhti ka dib, dhagaystayaashu waa ay ku daalayaan sheekada cudurka. Inkastoo loo baahan yahay inaan soo tabinno dhibaatooyinka naxdinta leh ee COVID-19, haddana waxaa wanaagsan inaan isku dayno helidda sheekooyin dhiirigalin leh oo ku saabsan sida dadka qaar ay ugu guuleysteen la tacaalidda waqtiyada adag.

Waxaa muhiim ah in laga fogaado sheekooyinka sababi kara jahwareerka, oo aan wax qjimo leh ku soo kordhineyn qofka iyo bulshada.

Ka soo waramidda saxda ah ee COVID-19, waxay u baahan tahay marka hore inuu suxufiga fahmo xaqiiqooyinka aasaasiga ah ee la xiriira Cudurka, isla markaana uu meel iska dhigo khuraafaadka iyo wararka ku-tiri-ku-teenta ah ee laga faafiyay cudurka, kuwaas oo aan sal iyo raad toona laheyn. Si taa la mid ah, saxafiyiintu waa inay isku dheelitiraan kaalintooda kor joogteynta iyo isla xisaabtanka, iyo dowlkooda gudbinta macluumaad sax ah oo lagu kalsoonaan karo, si ay bulshada ugu caawiyaan inuu joogsado ama yaraado saameynta Cudurka.

*Inta uu jiro  
cudurka  
safmarka ah,  
mar walba  
ma awoodi  
doontid inaad  
booqato  
isbitaallada,  
balse waxaad  
kula xiriiri  
kartaa hawl-  
wadeennada  
caafimaadka  
iyo  
shaqaalah  
isbitaallada  
qaabab kale  
sida khadka  
taleefanka  
tusaale  
**#449** ama  
**#499.***

Inta aadan ka soo warbixin, ugu horreyn hubi inaad xiganeyso ilaha rasmiga ah ama kuwa lagu kalsoonaan karo xogtooda, si aad macluumaa dhab ah oo waxtar leh oga tabiso Cudurka.

Ururka Suxufiyiinta Adduunka iyo Hey'adda Thompson Foundation waxay ku talinayaan arrimaha soo socda si loo xaqiijiyo warbixin ku saleysan xaqiiqada:

- Ha soo xiganin wax kasta oo aad ku aragto baraha bulshada, adiga oo aan marka hore iska hubin;
- La xiriir khubarada aqoonta uleh ama hey'adaha ku shaqada leh caafimaadka ee ka hawlgala dalkaaga si aad u xaqijiso macluumaa dka;
- La tasho mareegaha internetka (websites) ee ururrada sumcadda leh;
- Inta uu jiro cudurka safmarka ah, mar walba ma awoodi doontid inaad booqato isbitaallada, balse waxaad kula xiriiri kartaa hawl-wadeennada caafimaadka iyo shaqaalaha isbitaallada qaabab kale sida khadka taleefanka tusaale #449 ama #499.
- Waa inaad la timaadaa asbaab wanaagsan si aad ugu qanciso saraakiisha caafimaadka iyo hey'adaha ku shaqada leh inay ku siiyaan macluumaa dka;
- Ka warbixi oo soo wari kaliya waxa ay kuu sheegayaan xirfadlayaasha caafimaadka iyo sidoo kale hey'adaha ku shaqada leh. Ogow, haddii ay macluumaa dkaagu aysan sax aheyn waxaad luminaysaa kalsoonida dhagaystayaashaada;
- Ka warbixinta caafimaadka mararka qaar waxay ku lug yeelan kartaa soo gudbinta arrimo la xiriira cilaqaadka dadka iyo caqidooyinka ay aaminsan yihiin, sidaa darteed waa mowduuc aad xasaasi u ah. Badanaa waxaa la abuuraa warar been-abuur ah, waxaa la faafiyyaa dacaayado, khuraafaad iyo warar ku-tiri-ku-teen ah oo loo ekeysiiyay sida xaqiqooyin sugar. Mararka qaarkood, si ulakac ah ayaaba dadka loo marin hababiyyaa.
- Ka fogow tabinta wararka ku-tiri-ku-teenta ah maxaa yeelay waxay sii kordhinayaan jahwareerka, waxayna faafinayaan cabsida iyo walwalka bulshada. Xanta guud ee laga taxadarayo waxaa ka mid ah tirada dadka uu soo ridanayo cudurka, iyo kuwa u geeriyoonya. Xogtaas kaliya waa in laga helaa oo laga soo xigtaa ilo-wareedyada rasmiga ah sida Wasaaradda Caafimaadka, Maamullada Isbitaallada iyo Hey'adaha kale ee Guud. Haddii aad uga shakiso inay hay'adaha ku shaqada leh arrinta ay qarinayaan macluumaa dhabta ah, la shaqee, oo xiriir la samee ilaha kale ee lagu kalsoonaan karo sida shaqaalaha Caafimaadka ee dul jooga bukaannada.
- Iska ilaali xasaasiyadda oo had iyo jeer xogta aad soo gudbinezsid kala tasho Wasaaradda Caafimaadka ama Hay'adda Caafimaadka Adduunka (WHO), si aad u hesho macna guud iyo dheellitirnaan. Wararka aad bulshada u gudbinezsid waa inay had iyo jeer ku jiraan macluumaa dhabta ah, la shaqee, oo xiriir la samee ilaha kale ee lagu kalsoonaan karo sida shaqaalaha Caafimaadka ee dul jooga bukaannada.
- Haddii aad kala garan weyso in xogta hoose aad heshay ay run tahay iyo in kale, waxaa xirfadnimo badan inaadan soo sheegin warkaas oo aadan ku soo darin sheekada illaa aad ka hesho xaqiqda oo dhameystiran.

- Ixtiraam arrimaha gaarka u ah bukaannada iyo qoysaskooda. Wax sawiro ah ha ka qaadin bukaannada qaba cudurka ama kuwa looga shakisan yahay, adigoo aan ka heysan oggolaansho buuxa, kana fogow inaad xogtooda shakhsiga ah oo ay ku jiraan sawiradooda ama muuqaaladooda ku faafisid warbaahinta oggolaansho la'aan, kana fogow inaad xog iyaga ku saabsan oo naftooda khatar gelin karta aad daabacdo.
- Aqoonsiga bukaanka waxaa la shaacin karaa oo kaliya marka uu si iskiis ah isku soo bandhigo, iyo haddii loo arko in sheekadiisa ay gacan ka geysaneyso wacyi-galinta bulshada si looga fogaado faafitaanka cudurka. Waxaa loo baahan yahay mar kasta inuu bukaanka faham dhameystiran ka heysto halista kaga imaan karta haddii aqoonsigooda la shaaciyo ama haddii xogtooda gaarka ah la baahiyo.

### FAHMIDDA COVID-19

Saxafiyiinta waxey si wax ku ool ah uga warbixin karaan cudurka COVID-19 markii ay qudhooda faham buuxa ka heystaan cudurka. Tani waxay muhiim u tahay nafsadooda iyo tan bulshada ay warbixinta siinayaan.

Marka si shakhsii ah loo eego, fahmizza cudurka waxay ka caawin kartaa saxafiga inuu garto asataamaha cudurka goor hore haddii uu ku dhaco COVID-19.

Sidoo kale marka laga eego dhanka warbixinta, saxafiga wuxuu awood uyeelanayaa inuu bulshada ka wacyigaliyo astaamaha iyo siyaabaha kala duwan ee uu ku faafo cudurka. Hay'adda Caafimaadka Adduunka (WHO) waxay soo bandhigtay tilmaamaha soo socda ee COVID-19: COVID-19 waa cudur la is qaadsiiyo oo uu sababo feyruska Corona, kaas oo dhowaan la helay. Tilmaamaha WHO ee sida looga fogaado COVID-19 waxaa laga heli karaa halkan: <https://www.who.int/emergencies/diseases/novel-coronavirus-2019/advice-for-public>:

### Astaamaha



Waxaa muhiim ah in la xusuusnaado in COVID-19 uu yahay cudur cusub kaasoo dadka oo idil, xitaa khubarada caafimaadka ay maalin walba wax cusub ka ogaanayaan. Astaamaha cudurka waa ay kala duwanaan karaan qofba qofka kale, habka laysku qaadsiiyana xilligan wali si dhameystiran looma fahmin. Waxaa muhiim ah in lala tashado khubarada caafimaadka marka ay jirto culeys dhanka neefta ah, iyo qufac is-daba-joog ah. Marka loo eego macluumaadka laga helay Hay'adda Caafimaadka Adduunka dadka ugu badan ee uu saameeyay cudurka waxay la kulmaan qufac qalallan iyo dhibaato dhanka neefsashada ah oo aan la tacaalid gaar ah u baahneyn. Qaar kale waxa ay wajahaan xanuun dhanka neefmareenka ah, taas oo u baahan inay helaan adeeg caafimaad iyo hubin ay ku ogaanayaan inay feyraska qaadeen iyo in kale.


### U nuglaanta Cudurka



Dadka waayeeleka ah iyo kuwa la il daran dhibaatooyinka caafimaad sida wadna xanuunka, sonkorowga, cudurrada neef mareenka iyo kansarka ayaa ah dadka ugu badan ee uu soo rito COVID-19.

## Gudbinta Cudurka

Waxaa guud ahaan la isku raacay in fayraska 'COVID-19' uu ku faafo ugu horreyn dhibcaha candhuufa ah ama dheecaan ka soo baxa sanka markii qof qaba cudurka uu qufaco ama hindhiso. Sidaa awgeed, waxaa muhiim ah in la qaado tallaabooyin ka hortag ah sida xirashada maaskarada, ka-fogaanshaha taabashada aan loo baahneyn ee jirka dadka kale iyo joogteynta gacmo-dhaqashada. Haddii ay dhacdo inaad qufaceys, ku samee suxulkaaga oo laaban.



Soo saaridda tallaalka COVID-19 ayaa ka bilaabatay wadamada qaar ka dib markii la ansixiyay in loo isticmaalo xaaladaha degdeffa ah ee dalalka Maraykanka iyo Boqortooyada Ingiriiska. Sidoo kale Tallaallada COVID-19 ee lagu soo saaray Shiinaha iyo Ruushka ayaa loo isticmaalay tijaabo ahaan dalal dhowr ah. Qaar ka mid ah 192 dal oo adduunka ah ayaa saxiixay hindisaha COVAX oo ay hormuud ka tahay Global Alliance for Vaccines, GAVI, si loo hubiyo in xitaa dalalka dakhligoodu hooseeyo ay helaan tallaalada. Ma jiro waqtii cayiman oo la cayimay oo ay tallaalladaani gaarayaan Afrika.

## Habka warbixinta hoos-ilaa-kor (Bottom-up)



Maaddaama dadweynuhu ay xiiso ku heysku inay ogaadaan waxa ka dhacaya dunida heer caalami, heer goboleed iyo waliba heer qarameed, bulshadu waxay doonayaam inay ogaadaan xaaladda caabuqa COVID-19 ee deegaankooda iyo goobaha ku xeeran. Ilaa iyo inta suurtagal ah, saxafiyiinta waa inay ku dadaalaan inay bulshada deegaanka siiyan maclumaad sax ah oo ku saabsan xaaladda aafada ka jirta deegaankooda, tuulooyinka ku hareeraysan iyo sidoo kale tallaabooyinka ka caawin kara inay ka fogaadaan cudurka ama ay faafiyaa si ay naftooda iyo tan dadka kaleba u badbaadiyaan. Sidoo kale waxaa wanaagsan inay saxafiyiinta ku soo gabagabeeyaan warbixintooda lamabarada degdeffa ee la wici karo haddii uu qofka isku arko ama uu isaga shakiyo Caabuqa.

Markii aad sheegeyso talaabooyinka ka hortaga ah sida kala fogaanshaha bulshada, waxaa haboon inaad ku gudbiso farriintaada luqad fudud oo dadka oo dhan wada fahmi karaan, tusaale ahaan halkii aad ku sheegi laheyd mitir iyo feet, waxaa wanaagsan inaad adeegsato waxyaabaha ay dadka wada fahmi karaan sida tirada tillaabada, dhererka gacmaha, iyo tirada dhudhun ee u dhaxeysa labada qof.

## Raadinta Ilo-wareedyo

Si guud warbixinta marka ay xiganeysyo tixraacyo lagu kalsoonaan karo waxay noqotaa mid ay dhageystayaashu isku halleyn karaan xaqiqadeeda. In la aqbalo sheekadaada oo lagu kalsoonaado waxay ku xiran tahay heerka lagu kalsoon yahay ilaha aad kasoo warineysyo. Waxaa muhiim ah inuu wariyaha sameysto ilo maxallii ah iyo kuwa caalami ah oo uu ka helo macluumaadka Caabuqa safmarka ah ee Corona.

Had iyo goor, waxaad baadigoobtaa khubarada caafimaadka si ay kaaga caawiyaan inaad hesho tirakoobyada laga sameeyo Caabuqa iyo sidoo kale inaad fahanto waxyaabaha ay ula jeedaan isbadallada ay sheegayaan, si aad dadka ugu gudbiso luqad fudud oo la fahmi karo.



Ururka Suxufiyiinta Adduunka (IFJ) wuxuu kugula talinayaan inaad adeegsato habka soo socda si aad ugu xeeldheeraato tixraaceynata warbixinna. Sidoo kale wuxuu soo bandhigayaa ilaha qaar ee laga heli karo macluumaadka khabiirka, sida:

- Inaad la tashato Hay'adda Caafimaadka Adduunka (WHO)
- Inaad talo ka qaado khubarada cudurrada faafa iyo khubarada caafimaadka; iyo
- Inaad la hadasho khubarada adeegga caafimaadka bulshada ee dalkaaga.

## Helidda Ilo-wareedyo Lagu Kalsoonaan karo

Waxaa jira dhowr ilo-wareedyo oo internet-ka ah oo laga heli karo macluumaad sax ah oo ku saabsan COVID-19, balse waxaa laga yaaba in aysan ahayn kuwa ku filan, sidaa darteed ayaa loogu baahnaan karaa ticraacyo ballaaran iyo cilmi-baarlis. Tusaale ahaan, Hay'adda Caafimaadka Adduunka waxay leedahay bog internetka ah (Dashboard) oo u gaar ah COVID-19, kaas oo la cusbooneysiyo 24 saac kasta. Si kastaba ha noqotee, kaliya waxaad ka heleysaa boggan xogta wadamada leh hanaan warbixinneed oo ka warbixiya Caabuqa COVID-19.

Haddii aysan jirin ilaha noocan oo kale ah, saxafiyiinta waxaa lagula talinayaan inay xogta ka raadiyaan hay'adaha qaranka ee ku shaqada leh. Saxafiga waa inuu si taxaddar leh ugu fiirsadaa tirooyinka uu ka helo ilo-wareedyada kaddibna uu la barbar dhigaa xogta uu hayo, si ay ugu fududaato inuu ogaado haddii ay jiraan wax iska hor-imaad ah oo u baahan in la cadeeyo iyo in kale.

Sidoo kale, waa inuu wariyaha ka xishoonin inuu macluumaad ka dalbado ama uu ka helo xarumaha Warbaahinnada Caalamiga ah ee leh ilo-wareedyo lagu kalsoonaan karo oo ku saabsan Caabuqa.

# MACLUUMAAD INTERNETKA LAGA HELO

Hoos waxaa ku qoran qaar kamid ah ilaha internetka ee xogta Caabuqa:

- Shabakado caalami ah oo caan ah, laguna kalsoonaan karo, sida webseytka Hay'adda Caafimaadka Adduunka (WHO): <https://www.who.int/> and the Centre for Disease Control (CDC) <https://www.cdc.gov/>
- [https://covid19.who.int/?gclid=Cj0KCQiA5vb-BRCRARIIsAJBKc6JEMIaPmsw2ugqbzrT8IdAEfUrb8O-Sr\\_TYWRWSWZHxAm9nNJ7IL9RsaAr\\_eEALw\\_wcB](https://covid19.who.int/?gclid=Cj0KCQiA5vb-BRCRARIIsAJBKc6JEMIaPmsw2ugqbzrT8IdAEfUrb8O-Sr_TYWRWSWZHxAm9nNJ7IL9RsaAr_eEALw_wcB)
- Hay'ado aan dawli ahayn (NGOs) oo lagu kalsoonaan karo, kuwaas oo ka hawlgala dalkaaga. Tusaale ahaan: Medecin Sans Frontieres (MSF) <https://www.msf.org>
- Machadyo caalami ah oo caan ah sida Jaamacadda Johns Hopkins <https://www.jhu.edu/>
- Barnaamijka Risk Communication and Community Engagement (RCCE) ee Xarunta OCHA iyo Wasaaradda Caafimaadka Soomaaliya: <https://covid19som-ochasom.hub.arcgis.com/pages/rcce>
- Warbaahinta waaweyn ee sida weyn loo ixtiraamo - sida BBC, Deutsche Welle iyo Radio France Internationale, oo ku soo saara wararkooda dhowr luqadood. Si lamid ah, warbaahinta kale ee caalamiga ah sida Al Jazeera, Reuters, AFP, Guardian, New York Times iyo The Times of London oo ah ilo-wareedyo la isku halleyen karo oo laga helo maclumaad si wanaagsan loo soobaaray oo ku saabsan COVID-19.
- Khariidada Kiisaska (Cases Map) oo saacad walba la cusbooneysiyo: <https://experience.arcgis.com/experience/685d0ace521648f8a5beeeee1b9125cd>
- UN Multimedia Newsroom (bilaash ah, laakiin u baahan in layska diiwaangeliyo) <https://www.unognnewsroom.org/story/en/225/unog-bi-weekly-press-briefing-222020/0/eyJpdil6IlduK3RZUGZoYUNKeExaSUkxWGpKaHc9PSlslnZhbHVljoNXBnODIkYnh4M3JGNDBiU1Z4aVJkQT09liwbWFjljoiZDcwN2UzMmU5Yzd kNjM5OG E3ND M5ZDFh YmE5N GZ m M2Ey Nm Z h MWZhMmU4ODhlYmNiZGUwMTMzZTZhZDI1Y2Y4NCJ9>
- Global Investigative Journalism Network (oo aad ka heli karto tilmaamo luqadobadan ku daabacan iyo talobixin ku hagta) <https://helpdesk.gijn.org/support/solutions/articles/14000110817-COVID-19-resources>

## Burinta Khuraafaadka

Ummad kasta ama bulsho kasta waxay leedahay fikrado u gaar ah oo aan sal iyo raad toona lahayn oo ku saabsan noocyada kala duwan ee cudurrada. Fikradahaan markii ay shaac baxaan waxaa loo yaqaannaa khuraafaad.

Quraafaadku waa khatar, maxaa yeelay waxay lumiyaan dadka, waxay ka marin hababiyaan jidka toosan ee cilmiga ah iyagoo sameynaya waxyaboo qaldan, xitaa waxaa laga yaabaa inay diidaan caawimaadda iyo talooyinka khubarada bixinayaan. Sidaa darteed, ka takhalusidooda waxay qeyb ka tahay masuuliyadda Wariyaha.

Bar billowga arrintan waa inuu wariyaha garto khuraafaadka ka dhix jira bulshada ee ku saabsan COVID-19, kadibna uu la yimaado dood cilmi ah, dhaqankana waafaqsan oo burin karta khuraafadaas.

Saxafiyyinta sidoo kale waa inay ka taxadaraan qaabka ay uga warramayaan khuraafaadka si ay qeyb ugu noqon faafinteeda. Markaad ka warbixineyo arrin khuraafaad ah, waxaa muhiim ah inaad raaciso sheegidda xaqiqda dhabta ah ee caddaynaysa inay been tahay.

IFJ waxay ku talineysaa in saxafiyyinta ay la tashadaan boggaga internetka ah ay leeyihiin aqoonyahannada, jaamacadaha, machadyada cilmi baarista ama warbaahinta guud.

Websayka WHO oo leh qayb ku saabsan macluumaad khaldan iyo khuraafaadka. Xiriirka ku habboon ee WHO ee ku saabsan khuraafaadka waxaa laga heli karaa internetka halkan:

**Mythbusters:** <https://www.who.int/emergencies/diseases/novel-coronavirus-2019/advice-for-public/myth-busters>

**Ama halkan:**

**Vaccines and immunization:** [Myths and misconceptions: https://www.who.int/news-room/q-a-detail/vaccines-and-immunization-myths-and-misconceptions](https://www.who.int/news-room/q-a-detail/vaccines-and-immunization-myths-and-misconceptions)

**Hoos waxaa ku yaalaa lambarro si bilaash ah oo deg-deg ah lagula xiriiri karo haddii ay dhacdo inaad shaqsi ahaan ugu baahan tahay caawimaad:**



Wac khadka tooska ah ee Wasaaradda Caafimaadka (# 449) ama khadka tooska ah ee Maamul Goboleedka haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah.

#499 - Wasaaradda Caafimaadka	#988 - Somaliland	#343 - Puntland
#499 - Galmudug	#449 - Hirshabelle	#449 - South West State
#499 - Banadir	#466 - Kismayo	#2123 - Luuq (Jubaland)

## **Doorka Kor-joogteynta**

Dadweynaha iyo xitaa mararka qaarkood hay'adaha ku shaqada leh waxay ku tiirsan yihiin oo ay isku halleyaan warbaahinta, si ay uga warbixiyaan habacsanaanta iyo cilladaha ka jirta dhanka daryeelka bukaanka iyo maareynta aafada cudurka.

Saxafiyiintu waa inay la socdaan xaaladda bukaanada ku jira daryeelka xarumaha karantiilka, xaaladaha lagu hayo iyo tayada daryeelka loo fidinayo. Waa inay sidoo kale ka warbixiyaan awoodda la heli karo si loo maareeyo tirada kiisaska yaalla, iyadoo laga eegayo dhanka sariiraha, qalabka neefta (Ventilators), qalabka caafimaad ay bukaanada u baahan yihiin iyo maareynta maaliyadda loo qoondeeyey in lagula tacalo Caabuqa.

## **Cuqdad**

Cuqdadeyntu waa dhibaato weyn oo heysata bulshooyin badan, oo ay kamid tahay Soomaalida. Haddii si fudud loo sheego, cuqdadeyntu waa in dhaleeceyn xun loo jeediyo ama in summad xun loo yeelo koox ama qof gaar ah oo bulshada kamid ah, iyadoo markaa lagu saleynayo qaab nololeedkooda, xaaladdooda bulsho ama caafimaad.

Dhaleeceyntan aan raadka laheyn waxaa sii huriya jahliga iyo dadka oo aan ku wacyi galsaneyn arrinta jirta ama xaaladda dadka kale. Tani waxay u horseeddaa dadka ku dhaqma inay kaliya eegaan dhinacyada nolosha dadkaasi ay ugu duwan yihiin bulshada inteeda kale.

Ku shaabbadeynta dadka sifo ama summad xun waxay keentaa takoor iyo cunsuriyad, sidoo kale waxay caqabad ku noqoneysaa dagaalka ka dhanka ah COVID-19 iyo cudurrada kale. Sababtoo ah waxay dadka lagu sameeyo ku qasabtaa inay qariyaan ama aysan ka hadlin xaaladdooda, taas oo keeni karta inuu cudurka soo laba kacleeyo.

Saxafiyiinta waxaa loo baahan yahay inay gacan ka geystaan ka hortagga arrintan, si looga hortago Caabuqa oo faraha ka baxa. Waxaa haboon inay bulshada ku wacyi galiyaan inay la xiriiraan hay'adaha ku shaqada leh ama ay booqdaan xarumaha caafimadka haddii ay isku arkaan astaamaha cudurka oo aysan aaminin khuraafaadka iyo beenaha aan waxba ka jirin. Waxaa haboon inay bulshada ugu sheegaan arrintan luqad fudud oo macno dhameystiran gudbineysa, sidoo kale waa inay saxafiyiintu abuuraan dood wax ku ool ah oo ka hadleysa xaqiiqda dhabta ah ee cudurka, isla markaana burrineysa beenta iyo khuraafaadka caan baxay ee ku saabsan COVID-19.

# BADQABKA


Mabda' aasaasi ah oo ka mid ah mabaadii'da ugu waaweyn saxaafadda ayaa ah "Ma jirto sheeko u dhiganta noloshaada", tani waxaa loola jeedaa 'marnaba nafsadaada ha dhigin boos halis ah oo aad ku waayi karto nafsadaada markii aad ku jirto shaqada saxaafadda. Saxafiyiinta si ay u gutaan waajibkooda war-tabineed waxaa muhiim ah inay ka taxadaraan noloshooda, oo ay ilaaliyaan taloooyinka badqabka oo ee ay soo jeedinayaan khubarada caafimaadka.

## Ka fogow COVID-19 adiga oo raacaya tilmaamaha soo socda:



- Xiro afsaab ama af-dabool: Xirashada afsaabka waxay hoos u dhigtaa suurtagalnimada inaad qaado cudurka, sidoo kale waxay yaraysaa masaafada adiga oo aan khatar galayn aad kula hadli kartid qof aan xirneyn afsaabka. Waxaa aad u sii wanaagsan haddii labadiinaba aad wada xiran tiihin afsaabka, waayo waxey yareeneysaa khatarta cudurka.
- Ilaali masaafada bulshada (u jirso masaaflo laba mitir ah dadka). Masaafadan waxaa lagu qiyaasi karaa dhirir ahaan labada gacmood oo la kala fidiyay.
  - Dhaqo gacmahaaga, oo isticmaal gacmo-nadiifiye (Sanitizer) ka hor iyo ka dib wareysiyyada iyo/ama marka aad taabato dadka.
  - Ka fogow qof kasta uu muujinaya astaamaha cudurka sida qufac qalallan ama hindhisoo badan.
  - Agabkaaga sida kaamirooyinka, duubayaasha codka iyo mikarafoonada u isticmaal jeermis-dile.
- Agabkaaga sida kaamirooyinka, duubayaasha codka iyo mikarafoonada u isticmaal jeermis-dile.
- Ilaa ay lagama maarmaan noqoto, sida inaad war tabineyo, raadi habab kale oo aad xogta ku heli karto.
- Markaad joogtid isbitaallada, xiro agabka iyo dharka ilaalada ee loogu tala galay in looga hortago feyraska.
- Dadka ula xiriir qaab internet-ka ah, wac ilo-wareedyada, adeegso email-ka ama qeybaha kala duwan ee baraha bulshada sida Whatsapp, Skype, iwm halkii aad si toos ah u kulmi laheydeen.
- Haddii aad guriga kasoo shaqa gali karto waa arrin wanaagsan, la tasho maamulahaaga oo kala hadal arrintaas, hana imaan xafiiska ilaa ay jirto arrin aad lagama maarmaan u ah.
- Yareey tagitaankaaga shirarka jaraa'id iyo munaasabadaha kale ee guud.

- Markii aad ku gaareyso ujeedkaaga, adeegso war-saxaafadeedyada, wareysiyada qadka taleefanka ama jawaabo u raadi su'aalaha laguu soo diro.
- Hubi in cidda madaxda ka ah meesha aad ka shaqayso ay kuu diyaarisay tas-hilaad ku caawinaya haddii uu ku haleelo cudurka adiga oo waajibaadkaaga shaqada gudanaya.
- Ka joog u safridda meelaha khatarta ah ee uu cudurka aad ugu faafay, haddii aad aadeysidna hubi inaad heysato dhamaan agabka ka hortagga sida afsaabka, senitizer-ka, saabuunta, biyaha iyo cunnada diyaarsan.
- Markasta heysos liis dad aad ku kalsoon oo aad la xiriiri karto, haddii aad gasho xaalad degdeg ah.
- HADDII aad dareento inaadan fiicneyn, ama aad isku aragto astaamaha COVID-19, waxaa muhiim ah inaad si degdeg ah ku qaado tallaabooyin ka hortag ah, si aadan u saameyn dadka kale ee kugu hareereysan.
- Raadi daryeel caafimaad oo degdeg ah, iskuna day inaad marto tijaabada baaritaan ee COVID-19.
- Haddii aysan suurragal aheyn inaad hesho caawimaad dhaqtar, is-karantiil muddo 14 maalmood ah, ku dadaal inaad hesho baaritaanka cudurka, isla markaana raac talooinka caafimaad ee xilliga karantiilkii.



### Xarumaha Warbaahinta:

Xarumaha warbaahinta sidoo kale waa inay qaadaan tallaabooyin gaar ah si ay u hubiyaan badqabka shaqaalahooda:

- Shaqaalahaaaga ku wacyigali astaamaha iyo tallaabooyinka looga hortago cudurka, si ay uhelaan macluumaad ku filan oo ay nafsadooda ku badbaadin karaan.
- Si joogto ah u xusuusi shaqaalahaaaga muhiimadda ay leedahay inay jeermis dilaan qalabka ka hor iyo ka dib inta aysan ku shaqeynin, sidoo kale hubi inay heystaan waxyaabaha ay u baahan yihiin sida dilaha bakteeriyyada iyo jeelka (gel) jeermis-dilaha ah.
- Hubi in xubin kasta oo ka mid ah shaqaalahaaaga uu haysto liiska taleefoonada deg-degga ah. Liiskan waxaa ka mid ah nambarka guud ee xaaladaha degdegga ah, lambarka dhakhtarkooda gaarka ah iyo lambarrada mas'uuliyiinta caafimaadka.
- Si joogto ah ugu warqab xaaladda kooxda warbixinta kuugu maqan, u sheeg inaad soo wacayso waqtioyo cayiman si aad uga waraysato inay fiican yihiin




yo in kale, haddii ay dhibaato kuu sheegaanna hubi inaad ku gaarto sida ugu dhaqsaha badan.

- Kala hadal khataraha shucuureed ee la xiriira ka daboolidda dhibaatadan shaqaalahaaga. Walaacooda iyo walbahaarka ay la kulmi karaan waa in si dhab ah loo qadariyaa.
- U kala wareeji shaqaalahaaga shaqada culeyska leh iyo mappa dhibka yar.

## Isticmaalka Internetka

Isticmaalka internetka waa mid leh faa'ido iyo khasaaro labadaba. Mararka qaar haddii aad gujiso Email-lada, Link-yada iyo Lifaaqyada qaar waxaa laga yaabaa inay wataan feyrasyo dhibaato u geysan kara ammaanka qalabkaaga (Moobelka ama Kombuyutarka). Sidaa darted, badqabka

qalabkaaga awgeed, ka fogow furitaanka fariimaha iyo link-yada bogagga internetka ee aadan garaneyn.



Sidoo kale, waa inaad ka feejignaataa been abuurka qotada dheer. Baraha Bulshada waxaa ku baahsan warar beenabuur ah oo xaqiqda baal marsan, kuwaas oo dano kala duwan awgeed lagu marin habaabiyo dadka. Tusaale ahaan, cinwaanka saxda ah ee wargeys maalinle ah oo sheegay seddex dhimasho intii ay socdeen rabshadihi ka dhacay Kampala, ayaa la been abuuray si looga dhigo in 203 qof ay dhinteen.

Qaabka ugu wanaagsan ee aad u hubin karto wararka noocan oo kale ah waa inaad galiso 'mashiinada wax-baara' sida Google. Haddii aad weyso tixraacyo kale oo ka hadlaya arrinta, gaar ahaan kuwa warbaahinta lagu kalsoon yahay, waxay u badan tahay inuu warkaas been abuur yahay.

Is weydii halka ay ka timid xog kasta oo aad Internetka ka hesho, iskuna day inaad raadiso isha asalka ah. Hubi haddii ay xiriir la leedahay il wareed laysku halleyn karo sida Hay'ad dowladeed, Urur caafimaad, Aqooniyahano ama khubaro caafimaad.

# **KA SOO WARBIXINTA ARRIMAH JINSIGA, SOO GALOOTIGA IYO DADKA DIB UGU SOO NOQDAY DALKA**

Degganaansho la'aanta, cudurrada faafa iyo dhibaatooyinka waxay si gaar ah u saameeyaan haweenka, waana kuwa inta badan u nugul inay ku dhacdo dhibaatada. Sidaa darteed, waxaa muhiim ah inaan warbixintenna diiradda ku saarno sida uu COVID-19 u saameeyo qeybaha kala duwan ee bulshada. Markii aan soo warbixeeyno:

- Waa inaan ka fogaannaa qalad-ka-fahanka iyo magac xumaynta haweenka.
- Waa in aan is weeydiinaa sida ay haweenku uga nabad gali karaan tacadiyada la xiriira galmaada iyo jinsiga xilliga COVID-19.
- Waa inaan qiimeynaa sida doorka loo qoondeeyay haweenka uu u yaraaday inta uu jiray aafada Caabuqa COVID-19.
- Tusaale ahaan, waa in aan is weeydiinaa sida ay haweenku u wajahayaan culeyska soo kordhay ee ah xanaaneynta carruurta iyo maareynta qoyska ka dib markii la xiray iskuullada, uuna yaraaday dakhliga ay soo xareen jireen ragga?
- Waa in aan is weeydinaa badqabka haweenka shaqeeya ee soo galootiga ah iyadoo lagu jiro xayiraadaha safarka iyo bandowga lagu soo rogay isku-socodka?

## **Ajnabi nacybka, COVID-19, Muhaajiriinta iyo Qaxootiga Soo Laabtay**

Xeerka Anshaxa ee Ururka Suxufiyiinta Adduunka waxa uu sheegayaa in “Saxafiyiinta ay hubiyaan in faafinta macluumaadka ama ra'yigooda aysan sii kordhin nacybka ama takoorka.”

Sidaa darteed, warbaahinta waa inay ka feejignaataa faafinta dhacdooyinka ku lugta leh naceybka sida ajnabi-naceybka iyo baahinta hadallada naceybka ah. Waa inaysan u oggolaan dadka faafinaya naceybka inay ka faa'ideystaan qalabkooda.

Daraasad ay sameysay Hay'adda Caalamiga ah ee Socdaalka (IOM) oo ku saabsaneyd sida looga hortagi karo faquuqa iyo takoorka ka dhanka ah muhaajiriinta xilliga COVID-19 ayaa waxay ku sheegtay in kastoo Caabuqa COVID-19 uu “ keenay IS dhiirigelin ku saabsan wada-noolaanshaha oo ka imaaneya Dowladda, Ururrada bulshada rayidka, iyo Dadka sumcadda ku leh bulshada dhexdeeda”, hadana sidoo kale wuxuu sii xoojiyay dhaqankii hore ee soo-galooti naceybka iyo takoorka muhaajiriinta, xilli uu adduunka wajahayo aafada COVID-19.

IOM waxay kaloo intaa ku dartay in muranka badanaa ka billowda is afgaranwaaga shaqsiyeed ee ku saabsan ilaalinta xeerarka kala fogaanshaha dadka ay si dhaqsi ah isugu beddeli karaan aflagaado jinsi ka dhan ah ama rabshad toos ah oo ka dhan ah muhaajiriinta ama dadka loo arko inay ajaanib ama asal ahaan ka soo jeedaan meelo kale.

Dhacdooyinka noocan oo kale ah ee heyb sooca iyo takoorida waxay badanaa ka dhacaan meelaha ay ku dambeeyaan sinaan la'aanta baahsan waxayna saameyn weyn ku leeyihiin caafimaadka bulshada, iyo meelaha kale, sida waxbarashada, shaqada,

adeegyada bulshada iyo helitaanka cadaaladda. Cudurkaan safmarka ah wuxuu soo muujiyay, oo dibadda usoo bixiyay sinaan la'aantii hore bulshada ugu jirtay. Taasoo ah arrin muhaajiriinta galineysa khatar weyn oo sababi karta xadgudubyo ka dhan ah iyaga, taasoo laga yaabo inay dhibaato u geysato caafimaadkooda maskaxeed iyo jireed, sidoo kalena laga yaabo inay ka baajiso helidda adeegyo ay helaan dadweynaha guud.

### **Maxaa laga taxadarayaa?**

IOM waxay bixineysaa tusaalooyinka soo socda ee cunsuriyada iyo ajnabi naceybka ah kuwaas oo ka dhan ah muhaajiriinta, isla markaana loogu baahan yahay inay saxafiyiinta ka taxadaraan bulshadana ka wacyi galiyaan.

- Adeegsiga magacyo kale marka la sheegayo Feyraska COVID-19: halkii la adeegsan lahaa magaca diiwaangashan ee uu adduunka u aqoonsan yahay cudurka, saraakiisha qaar waxay qaateen magacyo tixraacyo juqraafi leh, kuwaa oo tixraacaya in Feyraska Shiinaha ka soo bilaawday. Haddaba, sida ay hore u sheegtay WHO sanadkii 2015, magac-bixinta cudurrada waa mid aad muhiim u ah, maadaama ay cuqdad ku abuuri karto bulshooyinka qaar, ayna kicin karto fal-celin.
- Warbixinna qaar ee warbaahinta oo laga yaabo inay asalka iyo faafitaanka cudurka ku eedeeyaan bulshooyin gaar ah, taasoo noqoneysa arrin xasaasi ah.
- Refusal to sit next to passengers of a certain or perceived ethnic origin on public transports metros and buses.
- Diidmada in la ag fadhiisto dadka asal ahaan kasoo jeeda dalalka uu ka yimid cudurka, marka gawaarida dadweynaha sida basaska iyo tareennada la isticmaalaayo, taasoo noqoneysa takoor lagula kacay dadyòw gaar ah.
- Weerarada afka ah iyo aflagaadooyin lagu yiraahdo jidatka iyo baraha bulshada.
- Weeraro gacan ka hadal ah, sida handadaada, dhagax tuurka dadka soo galootiga iyo kuwa dib u soo noqonaya.
- Calaamadaha ka mamnuucaya dadka asal ahaan ka soo jeeda meelaha lagu tuhunsanyahay cudurka inay galaan maqaayadaha iyo dukaamada.
- In dadka kasoo jeeda meelaha qaar ee lagu tuhunsan yahay cudurka loo diido in laga kireeyo guryaha.
- Barakicinta iyo gurya ka saarista dadka kireeystayaasha, takoor awgiis.
- U xoog-sheegashada ka dhanka ah muhaajiriinta ee ka dhacda shaqada iyo iskuullada.
- Shaqo ka joointa lagu sameeyo dadka ayadoo lagu saleynayo asal ahaan meesha uu ka yimid.
- Meheradaha oo la ogolaado in la xiro ama la furo ayadoo loo eegaayo dhalashada milkiileyaasha.
- Hay'adaha Amniga oo u adeegsada awood xad-dhaaf ah muhaajiriinta si ay u dhaqan-geliyaan bandowyada, xayiraadaha dhaqdhaqaaqa iyo tallaabooyinka kale ee ka dhanka ah COVID-19.

- Weerar afka iyo kuwa siyaasadeed ee ka dhan ah heshiisyada dhaqdhaqaaqa xorta ah, sida midka ka jira gudaha EU.
- U diidista waxbarashada iyo daryeelka caafimaadka dadka asal ahaan ka soo jeeda ama loo maleenayo inay kasoo jeedaan halka uu cudurka ka yimid.
- Baaritaanka COVID-19 ee khasabka oo lagu dabaqo muhaajiriinta oo kaliya intaan shaqada lagu laaban kahor.

Iyada oo khilaaf bulsho, fursad dhaqaale iyo isbeddelka cimilada ay barakicinayaan dadka, socdaalku waa xaqiiqo ka jirta dunida casriga ah.

Iyadoo dagaallada sokeeye, fursadaha dhaqaale oo iska yar iyo isbadelka cimilada ay barakicinayaan dad badan, socdaalka ama haajiridda waxa ay noqtay xaqiiqo ka jirta dunidan casriga ah. Arrimaha ugu badan ee ay Soomaalida u socdaalaan ama ay dalka ugu haajiraan waxaa ka mid ah:

- **Haajiridda khasabka ah:** oo ay sababo dagaallada sokeeye iyo masiibooyinka dabiiciga ah, taasoo keenta inay dadka ku barakacaan gudaha (IDPs), ama ay u haajiraan dalka dibaddiisa, oo ay qaxooti noqdaan.
- **Haajiridda aan caadiga aheyn:** taas oo ay sababto saboolnimada iyo fursadaha nolosha oo yar awgeed. Inta badan waxaa ka dhasha tahriibinta iyo ka ganacsiga dadka.
- **Haajiridda isku dhafan:** waa socdaalka iyo safarka ay sameeyaan dhowr kooxood oo muhaajiriin ah sida magangalyo-doonka, dadka nolol-raadiska, iyo dadka dhibbanayaasha u ah tahriibka.
- **Haajiridda soo-jireenka ah oo xuduudaha dhaafta:** tani waa midda ay sameeyaan dadka deggan xudduudaha sababo ganacsi iyo wax-is-dhaafsi awgood. Sidoo kale waxaa sameeya xoolo-dhaqatada iyo reer-guuraaga isaga gudba xudduudaha dalalka dariska ah.
- **Haajiridda Shaqada:** waa haajiridda ay dadka uga tagaan dalkooda, ayagoo shaqo doon ah.

- Maadaama Covid-19 markiisii ugu horreysay loo arkay cudur shisheeye oo ajnabi ah, waxay welwel ku beertay dadka muhaajiriinta iyo kuwa soo galootiga ah oo ay ka mid yihiin kuwa dib ugu soo noqoneya dalka.
- Tani waxay sidoo kale oo ay abuureysaa khatar ah in dadka tahriibka qasabka ah lagu keenay ama dib u celinta lagu soo sameyay loo arki karo inay yihiin kuwo faafinaya Caabuqa Covid-19.
- Qowmiyadaha laga tirada badan yahay ayaa sidoo kale u noqon karo bartirmaameed ceebeynta, suxufiyiintana waxaa looga baahan yahay inay si gaar ah uga taxadaraan markay wax ka qorayaan iyaga iyo Covid-19.

Waxaa muhiim u ah saxafiyiinta inaysan adeegsanin luqad u keeni karta kooxahaas ceebeyn. Waxaa la doonayaa inaad:

- Ka fogaataan luqad la xiriirineysa cudurka jinsiyadda, dhaqanka ama shaqada dad gaar ah;
- Iska ilaalisaa inaad ku lifaaqdo asalka fayraska ama cudurka deegaan ama isir gaar ah. Cudurkani maaha fayraska Shiinaha, ama fayraska Aasiya. Si looga fogaado in sheekooyinka xun ay bataan, fadlan isticmaal magaca rasmiga ah ee cudurka (COVID-19) ama “cudurka cusub ee coronavirus”.
- Ka fikirtaa ka hor inta aadan ugu yeerin dadka jiran “kiisas”: Dadka jiran waa bini'aadam cudurku ku dhacay, oo mudan xushmad. Yaanan ka qaadin bini'aadnimada, oo aynan ugu yeerin “kiisas”, haddii aysan daruuri aheyn.
- Sharaxdaa in COVID-19 uu saameyn ku yeelan karo qof kasta jinsiguu doono haka soo jeede, dhaqanka uu rabo ha yeeshay ama shaqada uu rabo ha qabtee;
- Sharaxdaa maadama cudurku ka dhex dilaacay bulshada dhexdeeda in shisheeyuhu aysan ahayn dadka kaliya ee faafin kara Covid-19.
- Ka warqabtaa in diirada oo la saaro asalka Covid-19 ay abuuri karto in bulshooyinka dareemaan in ay ka badqabayaan waxa ka jira dibadda, sidaa darteedna ay keeni karto in dadku is dhigtaan, taas oo kordhin karta halista ah in ay cudurka ka qaadaan isla deegaankooda.

Waxaa muhiim ah in saxafiyiinta ay iska ilaaliyaan luuqad kasta oo dib u soo nooleyn karta cuqdad iyo naceyb hore. Hadalka nacaybka ah waa in laga fogaadaa ilaa sababta looga warbixinaayo ay tahay sidii loo burin lahaa mooyee.

IOM waxay ku talineysaa inay saxafiyiinta isha ku hayaan oo ay ka warbixiyaan dhacdooyinka dambiyada naceybka, ku xadgudubka xuquuqda muhaajiriinta ee masuuliyiinta dowladda, bulshada iyo xitaa warbaahinta lafteesa.

Warbaahintu waa inaysan ka weecan mas'uuliyyadda ka saaran inay soo tabiso dhacdooyinka tacadiyada faquuqa ku saleysan oo ay ku lug leeyihii saraakiisha dowladda waana inay daba-galaan ilaa ay ka soo af-jaraan.

Warbaahintu sidoo kale waxay u baahan tahay inay fahmaan xeerarka haga warbaahinta bulshada, gaar ahaan waxyaabaha lagu qori karo iyo dhex dhexaadnimadeeda, oo ay sidoo kale fahmaan waxyaabaha ka mamnuuca ah, isla markaana ay isku-dheellitiraan danta guud iyo kahortagga naceybka ka dhanka ah muhaajiriinta, iyagoo ogsoon in qof waliba leeyahay Xoriyadda afkaarta.

Sidoo kale saxafiyiintu waa inay hubiyaan in maclumaad kasta oo bulshada laga siinayo cudurka iyo faafitaankiisa uu yahay xaqiqa sugar oo leh tixraacyo lagu kalsoon yahay. Maclumaad dheeraad ah oo ku saabsan arrimahan waxaa ka heli kartaa xiriirada iyo link-yada hoose:

[iomsomaliapsu@iom.int](mailto:iomsomaliapsu@iom.int)

<https://stophatespeech.ch/>

# WARBAAHIN UJEEDDO LEH

Gabagabadii, ka saxaafad ahaan waxaa muhiim ah in sheekoooyinkeenna iyo warbixinnadeenna aan dooneyno inaan daabacno oo aan bulshada u bandhigno ay hiigsadaan ujeeddo sare oo ah in laga helo natijo togan oo bulshada hormarin kara. Dhacdooyinka waa inay u noqdaan oo keliya udub-dhexaad sheekooyinka aan soo tabineyno kuwaasoo bulshada u soo bandhiga su'aalo qoto dheer oo ku saabsan dhacdooyinkaas. Ma haboona inaan noqono kuwo iska soo horjeedda markaan hoowsaan ku guda jirno.

Dhamaanteen waan ka wada warqabnaa gaabisyada badan ee ka jira hannaankeena caafimaadka iyo sida ay u saameyn karaan hay'adaha dowladda iyo ururrada samafalka ee ka jawaaba baahiyaha bulshada.

Cod u noqoshada dadka nugul, kuwa la faquuqo iyo shaqaalaha safka hore ka taagan la dagaallanka cudurka ayaa sidoo kale keeni kara saameyn togan. Markaan kala shaqeyneyno mas'uuliyiinta arrimaha ku saabsan COVID-19, waxaan u baahanahay inaan baaritaan ku sameeyno sida wax qabadku u shaqeeynayo, caqabadaha hortaagan iyo aragtida saamileyda waaweyn ee ku aadan sida loo xallin karo.

Su'aalaha aasaasiga ah ee haboon inaan isweydiineyno marka aan kasoo warbixineyno COVID-19 waa inay noqdaan: Sidee ugu wanaagsan ee aan uga soo warbixin karaa arrimaha muhiimka ah ee taagan? Sidee warbixintaydu gacan uga geysan kartaa abuurista fahamka arrimahan si loo helo isbeddel wanaagsan?



**WAXAA SOO SAARAY:**

Ururka Qaranka Suxufiyiinta Soomaaliyeed (NUSOJ)  
KM5, Bula Hubey, Wadajir District, Banadir, Mogadishu, Somalia

📞 +252-61-5889931

✉️ nusoj@nusoj.org

🌐 www.nusoj.org

🐦 @NUSOJOfficial



**EU-IOM**  
Joint Initiative for  
Migrant Protection  
and Reintegration



Project funded by the European Union  
Project implemented by IOM